# Su'aalaha Badanaa Nala Waydiiyo ee One&All

## Gancsi Abuurka Isku Dhafan ee Gobalka Lasing

**Sidee ayaa lagu aasaasay barnaamijkaan cusub ee ganacsi abuurka?**

One&All waa mashruuc ay naqshadaysay ayna bixiso Lansing Economic Area Partnership (LEAP) waxaan maal galisa Michigan Economic Development Corporation (MEDC, Isbahaysiga Hormarinta Dhaqaalaha ee Michigan) iyo Consumers Energy Foundation (Haayada Consumers Energy). LEAP (Iskaashatada Aaga Dhaqaalaha ee Lansing) waa urur macaash doon iyo dawli aan ahayn kaasoo u adeegga baahiyaha dhaqaale ee degmooyinka Clinton, Eaton iyo Ingham ee gobalka Michigan.

**Waa maxay One&All?**

One&All waa mashruuc iskudhafan oo bixinaaya taageero ganacsi abuur oo la siinaayo dadka doonaaya inay bilaabaan ama kobciyaan ganacsi, laakiin aan haysan khayraadka dhaqaale iyo xariirada iskuxirka ee muhiimka ah. Yoolka One&All waa in la kordhiyo sinaanta asagoo taageeraaya dadka ku dhaqan degmooyinka Clinton, Eaton, Ingham iyo Shiawassee kuwaasoo ku jira ama ka hooseeya Asset Limited, Income Constrained, Employed (ALICE) (Xadka Hantida, Danyarta ah, ee Shaqeeya), oo badanaa loo yaqaano danyarta shaqeeysa.

One&All waxay siinaysaa ka qaybgalayaasha mashruuca iskudar gaar ah oo ka kooban tababar ganacsi iyo toosin lagu bixinaayo barnaamij 2 bilood soconaaya, ayadoo sidoo kale ku xiraysa ka qaybgalayaasha urur xirfadlayaal ah iyo caawimaad dhaqaale.

Codsiyada waxaa lagu heli karaa elektaroonig iyo waraaqo labadaba ayadoo laga helaayo barta purelansing.com/oneandall. Barnaamijka One&All waxay socdaan muddooyin 2 bilood ah. Codsadayaasha ayaa dooranaaya mudada ayaga ku haboon ayagoo ku salaynaaya jadwalkooda markay codsanayaan.

**Sidee ayay One&All u shaqaysaa?**

Mashruuca One&All wuxuu soconayaa muddo 2 sano ah ayna ku jiraan mudooyinka badan ee midkiiba 2 bilood soconaayo wuxuuna leeyahay manhaj bixinaaya casharo farsamo iyo kuwo balaaran oo la xariira caqabadaha ganacsiga. Dhammaan mudada uu socdo barnaamijku, ka qaybgalayaashu waxay talo iyo taageero ka helayaan tababarayaal arintaas  xilsaaran si ay u gaarsiiyaan fikirkooda ganacsi ama xeeladooda kobcinta heerka labaad.

Codsadayaashu waxay heli doonaan dookh ay ku xushaan mudada ay barnaamijka ka qaybgalayaan ayagoo ku salaynaaya jadwalkooda markay codsanayaan.

Taariikhaha barnaamijku waa:

- Agoosto 2020 – Oktoobar 2020
- Janaayo 2021 – Maarso 2021

- Maayo 2021 – Luuliyo 2021
- Agoosto 2021 – Oktoobar 2021
- Janaayo 2022 – Maarso 2022
- Maayo 2022 – Luuliyo 2022

**Waa maxay cadadka maaliyadeed ee uu heli karo qof kasta oo barnaamijka ka qaybgala?**

Ka qaybgale kasta oo dhameeya barnaamijka 2 bilood soconaaya wuxuu heli doonaa deeq dhan $2,500.

**Sidee ayaa loo adeegsan karaa lacagta deeqda ah?**

Lacagta deeqda ah waxaa lagu adeegsan karaa sida uu go'aansado ka qaybgale kasta si loogu daboolo qarashaadka bilaabida ama kobcinta ganacsi, ayna ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn: qarashaadka sharciga, suuqgaynta iyo isgaarsiinta, baahiyaha qalabka iyo baahiyaha kale.

**Qasab miyay igu tahay inaan maro barnaamijka 2 bilood ah si aan u helo deeqda?**

Haa, waa qasab inaad dhamayso barnaamijka 2 bilood ah si aad u hesho deeqda $2,500 ah.

**Qasab miyaa inaan ku noolaado gobalka Lasing si aan uga qaybgalo mashruuca One&All?**

Haa, waa qasab inaad dagan tahay ganacsigaaguna ku yaalo gobalka Lasing (degmada (Clinton, Eaton, Ingham, ama Shiawassee)

**Xagee ayay kullanada barnaamijku ka dhacayaan?**

Xiisadaha tababarka, kullanada iyo dhammaan barnaamijyada kale ee One&All waxaa lagu qaban doonaa bii'ado amaan ah oo ku yaala deegaanada macaamiisheena. Barnaamijka koobaad waxaa la qabanayaa Agoosto gabi ahaana waxaa lagu qaban doonaa qaab oonleen ah. Kooxda One&All ayaa kaa caawinaaya la qabsiga dhammaan nidaamyada oonleenka ee la adeegsanaayo.

**Waa maxay ALICE?**

Cadaynta Asset Limited, Income Constrained, Employed (ALICE) (Xadka Hantida, Danyarta ah, ee Shaqeeya) waa heer xaqiiqi ah oo laga sameeyo Miisaaniyada Nolosha Qoyska. Cabirkaan wuxuu qiyaasayaa qarashka ugu yar ee ku filan shanta waxyaabood ee aasaasiga u ah nolosha qoyska, ayna ku jiraan: guriga, daryeelka carruurta, cuntada, gaadiidka iyo daryeelka caafimaadka.

Cadaynta ALICE (Xadka Hantida, Danyarta ah, ee Shaqeeya) waxaa ku jira qoysaska hela wax ka badan Heerka Faqriga ee Federaalka laakiin ka yar qarash aasaasiga u ah nolosha gobalka. 1.66 milyan oo qoys oo ku dhaqan Michigan (43% qoysaska Michigan) ayaan waqti xaadirkaan awoodin inay buuxshaan baahiyahooda aasaasiga ah ee nolosha qoyska.

Dakhliga qoysku waa inuu ka hooseeyaa cadadka ugu yar ee la cayimay kaasoo shardi u ah buuxinta baahiyaha aasaasiga ah ee qoyska, kaasoo ah kaliya wax ka badan $21,000 sanadkii ($10.52/saacadii) halka qoys ee ka kooban qofka aan xaaska lahayn ee wayn iyo wax a badan $61,000 ($30.64/saacadii) qoyska ka kooban afarta qof.

**Sidee ayaan ku ogaanayaa inaan u qalmo One&All?**

Waxaad u qalantaa One&All haddii aad buuxiso ama ka hoosayso Shardiga ALICE (Xadka Hantida, Danyarta ah, ee Shaqeeya) aadna haa uga jawaabto su'aalahaan:

- Ma doonaysaa inaad biloowdo ganacsi ama aad ganacsigaaga hormariso?
- Ma xiisaynaysaa waxbarashada farsamada, ee ganacata iyo tababar aad la galayso koox kale oo ganacsi abuurayaal ah sidaada oo kale?
- Diyaar ma u tahay mucaarad wax dhisaysa si aad ugu faa'iidayso ganacsigaaga?

Kooxdeenu waxay markasta ku faraxsan tahay inay kaala hadasho ganacsigaaga kahor intaadan codsiga dirin. Waxaad la xariiri kartaa Jerry Norris oo jooga Fledge aadna ka helayso jerry@thefledge.org ama ka wac (517) 230-7679 AMA Erika Brown oo katirsan Refugee Development Center ood ka helayso ebrown@rdclansing.org iyo 562-290-3660.

**Waa maxay noocyada fikradaha ay One&All raadinayso?**

One&All waxay xiisaynaysaa fikradaha dhammaan ganacsiyada – ayna ku jiraan kuwa aan macaash doon aan ahayn.

**Ma u baahnahay qorshe ganacsi?**

Qorshe ganacsi lagaama doonaayo. Waxaad u baahan tahay inaad na tusto diihaalkaaga iyo dadaalkaaga aadna muujiso inaad samaysay cilmi baaris hore.

**Ma loo baahan yahay in iskaashadahayga ganacsiga ama kooxda dhan ay ka qaybgalaan?**

Hal kamid ah dadka ganacsiga kula abuuray waa inuu noqdaa qofka ganacsiga matalaaya uuna ka qaybgalaa dhammaan casharada, kullanada tababarka iyo munaasabadaha. Waxaa fiican haddii dhammaan dadka ganacsiga wada leh ay joogaan warasiga koobaad, haddii ay suuragal tahay. Waa wax u fiican ganacsigaaga, laakiin qasab maahan, in iskaashatada ganacsigu kusoo biiraan kullanada kale ee barnaamijka.

**Ganacsigayga shirkada kale hoos taga ma u qalmaa mashruuca?**

Maya, ganacsigaagu ma noqon karo mid shirkad kale hoos taga ama la xariira haayadaha qaranka.

**Ganacsiyada aan macaash doonka ahayn ma yihiin kuwo u qalma mashruuca?**

Haa, kuwaa aan macaash doonka ahayn waa u qalmaan mashruuca hadday buuxshaan shuruudaha ugu yar ee codsiga.

**Ganacsiyada shaqsiga ah ama ganacswiyada guriga lagu dhex sameeyo ma u qalmaan mashruuca?**

Haa, ganacsiga gaarka ah iyo ganacsiyada guriga lagu dhex sameeyo waxay u qalmaan haddii ay buuxshaan shuruudaha ugu yar ee codsiga.

**Ma jiri doontaa muddo u cayiman codsiga?**

Waxaan filaynaa in codsiga deeqda ee barnaamijkaan inuu furmo Talaadada, Juun 30. Codsiyada waa la aqbali doonaa waana la muraajacayn doonaa si joogto ah ilaa dhammaan boosaska la buuxsho. Waxaa ugu fiican inaad iskudaydo soo gudbinta codsiga xili hore si aad u kordhiso fursadahaaga aqbalaada.

**Meeqa qof ayaa la xulanayaa muddo kasta oo barnaamijku socdo?**

Inta u dhaxaysa Agoosto 2020 iyo Luuliyo 2022, lix barnaamij oo midkiiba 2 bilood soconaayo ayaa la samaynayaa. Barnaamij kasta waxaa ka qaybgali doona ugu yaraan 20 qof.

**Sidee ayaan ucodsanayaa?**

Codsiga ayaa lagu heli karaa webseetka iyo asagoo daabacan kuna jira barta purelansing.com/oneandall. Haddii aad u baahan tahay caawimaad lagaa siiyo dhamaystirka foomka codsiga, la xariiri Refugee Development Center (Xarunta Hormarinta Qaxootiga) si aad u hesho taageero luuqado badan lagu bixinaayo ama The Fledge si laguu siiyo caawimaad ganacsi.

**Yaan la xariirayaa si aan u helo xog dheeraad ah?**

Haddii aad u baahan tahay caawimaad luuqado badan ku baxa intaad buuxinayso foomka codsiga, fadlan la xariiri Refugee Development Center (Xarunta Hormarinta Qaxootiga). Wixii su'aalo ah oo la xariira codsiga, fadlan la xariir The Fledge.

**Caawinaada Luuqada**
The Refugee Development Center (Xarunta Hormarinta Qaxootiga)
refugeedevelopmentcenter.org

Erika Brown
(562) 290-3660
ebrown@rdclansing.org

**Caawimaad Ganacsi**
The Fledge
thefledge.com

Jerry Norris
(517) 230-7679
jerry@thefledge.com

**Su'aalaha Guud ee la xariira Barnaamijka**
Lansing Economic Area Partnership (Iskaashatada Dhaqalaha ee Lasing)
purelansing.com/oneandall

Anum Mughal
anum@purelansing.com